QAAF WAX-MA-LEH

Maansadani waxay ka hadlaysaa gabar sharaf leh oo qoys sharaf leh ka dhalatay oo nin sharaf lihi soodoonay balse hooyadeed u diiddey o tiri wiilaan Eeddo u ahay oo dib adda jira cid aan ahayn haddii la siiyo aniga iyo gabadhuba sun baan cabbaynaa sidaasna la yeelay ka gadaal markii gabdhii ninkii loo dhoofiyeyna uu noqday nin nin kale u naag ah.oo la qabo . Halkaasna waxaa ka dhacay Habartii soddohda ahayd ina maryihii dhigtay ama waalatay markii sidasi loo sheegay gabadhiina naxdin iyo murugo ku habsatay xilligii ay sugaysey nolol farxad leh iyo rayrayn odaygii gabadha dhalayna waxay ku noqotay dhabanna hays waayo wuxuu xusuustaa wanaaggii uu lahaa ninkii ka so doonay intaan habartu arrinta ka fara maroojin iyo hadda habartii iyo gabadhiiba dhibaatada haysta oo aanu wax ka qaban Karin.

Cinwaanka Qaaf wax maleh waxaan ugu doortay qof soomaaliyeed oo yaraantii dugsi quraan ku soo bartay Qaaf kor ku labo leh haddii lagu yiraahdo Qaaf wax `maleh waxay ku noqonaysaa qaadanwaa iyo wax aanu rumayan Karin sidoo ayaa waxaa ula mid marka la yiraahdo ninkani waa Soomaali oo waa la qabaa..Waxaa xusuusin mudan ninkii reer dooloodka ahaa ee la yiri nin baa la guursadey ee toorayda is geliyey isagoo leh WAR GOORMAA RAGGU SIDAN U GO'AY.

Maansadu waa nooca iyagu is sharxa (self explanatory)oo waxayna ku bilaabanaysaa sidan: Waxayna isugu xigan beydadku siday isugu feer qoran yihiin sida fallaaruhu tilmaamayaan.

Qaalli Faarax baa dhalay
Inkastooy qof beled tahay
Weli tabaha qaar iyo

Hooyadeed-na waa Qarad
Midabkana qurxoon tahay
Qalin-daarka lama barin

Faaraxoo qaxweeyoo
Arkay Ciise-labaqaar
Inantaadii quruxdiyo
Qamar soo baxaayiyo
Qummanayd ma joogtaa

Harqoodaalka jooguu
Kuye Ina qulaanow
Qaymiga lahaydee
Qundhacada la moodee
Mise ruux kalaa qaba?

Qaxwihii horiil-buu
Qunyar wuxu u yiri haa
Qoyskay la nooshahay

Labojeer qab siiyoo
Qaalli gabanti aan dhalay
Qabitaanna kuma ogi

Qiraalkaas markuu helay
Qarsan waayey faraxii
Qalbigiisa saaqoo
Qosol gaaban dhool biray
Waxaan quud-darraynjirey
Hadday qoor bannaan tahay
Miyay kula qaraar tahay?

Duqii Ciise-labaqaar
Isagoon qofna ogeyn
Inta qoorta jimicsaday
Kuye Ina qulaanow
Inaan qoyska xididnee
Qaalli inad isiisaa

Wuxuu ina qulaan yiri
Qof keliyi ma bixiyoo
Kanay qarad cismaan tahay

Haddaad jamatay qalanjada
Qabiilay ka dhalataye
Qolyaan kala tashanayaa !!

Qawlkaas hadduu helay
Horay buu usii qumay
Qarad cusmaan u yeeroo
Laga tegey qol gaar u ah

Duqii Ciise-labaqaar
Kolkaa ina qulaan-baa
Qayladii carruurtaa
Qaxwena waa u yeerteen

Qawlkuu la yimid iyo
Qaninimada Ciisiyo
Inuu yahay nin qiima leh
Iyo qaab kastaba doon
Qarad ooriduu qabey

Siduu qaanac ugu yahay
Xigtanimada qoyskiyo
Qaallina kufkeeda ah
Si uu qaanac uga dhigo

Qoftii baanse ka aqbalin
Tiri qoon-kale u sheeg
Oday yohow qarwaayaa !!

Qorshuhuu hordhigayoo
Fikraddaada qaladka ah

Qarad waxay haddana tiri
Qaalli kor uga weyneyd
Qayilaaya siisaye
Qurbaha wiilki jirayee
Iyadoo ku qaanaca
Qasashada sun iyo dacar
Qatli bay ka jeceshahay
Fikraddeeda qaladka-la’

Qoftaad horay u bixisee
Yaad qoys aan hufnaynoo
Inantayda Qaalliya
Abtigeed qanyare dhalay
Haddaad siiso qolo kale
Ay qudhaba ku weydiyo
Anigaana kula qaba

Qammuunyiyo xanaaq iyo
Hayeeshee is-dabaqabey
Qoftaan horay u bixiyee
Haddii uu ka yimid qalad
Adna Qaalli bixiyo
Qurux waxay ka dheeftaba
Siin mayno qolo kale
Ciisena qoraal buu
Diiddey bixinta qalanjada
Dan baa qoofal gelisaye

Caraa qabatay odaygii
Kuye Qarad Cismaaney
Qaalli kor uga weyneyd
Kaa qaatay marakane
Qalad iyo samaan iyo
Qofkaad garato mooyee
Qabuul bay iyana tiri
Ugu diray inay qarad
Isna wayska qaancay

Duqdii Qarad Cisbaan baa
Inanki qurbaha jirey
Kute anigu waa Qarad
Inanki Qurbaha jirey
Siiyaye ha qaadee
Qaneecadu dhextaalliyo
Qorshahaas ogaysii

Qabadsiisay telefoon
Walaashiisi qoor lula
Gabantayda Qaalliya
Ee dhoollaqaawane
Dhulalkaas qabowgiyo
Qurbahana ha geeyee

Qoorluli waxay tiri
Qawlka Eeddo kaa yimi
Qabanqaabadii iyo

Qarad inad na siisiyo
Qaradeey ku mahadsanid
Wixii Qarash ku baxayana

Haddaan reer qanyare nahay Qabuul waanu wada niri

Qoyskii qurbaha jirey Waxay soo qalqaalsheen
Yarad qoyska lala rabey Hadiyad Qaalli loo diray
Iyo qarashiyaad kaloo Durba qoyski gaaroo
Amal ay ka qaateen

Marki reerki qarash helay Qawlad ay ku taagteen
Qaabkii dadkii hore Dhibaad bay qalqaalsheen
Qyska iyo deriskuna Qosol iyo mashxarad baa
Qaalli lagu sagootiyey

Qurxoontii madaarkii Daalaa ka qaaddoo
Geysey qoyski loo diray Qurbahay sugaysana
Qaalli faarax`waa timi

Hayeeshee qisaa timid Marki qoyski wadadegey
Qarad aanay filanayn Iyo Qaalli toonnihi
Oo reer qanyaruhuna Ogaa ayse qariyeen

Qaabki waalid falijirey Qarad waxay telefoon
Qabadsiisay wiilkay Siisay gabanta Qaalliya
Durbadiiba laga qabey Kute anigu waa Qarad
Gabantayda kii qabay Yarki dhoollaqaawane
Malla qawli karayaa?

Kii ka qabtay baa yiri Qarnigii horeetaan
Afrika uga soo qaxay Habar qaylinaysee
Islaan yahay qarwaysaa Qofkan kula hadlaayaa
Waxa weeye kii qabey **Gabadhaada kii qabey (ninka gabadhaada ninkii qabey baan ahay)**

Markay maqashay qawlkaas Waataas qarracantoo
Qarad xoortay maradii Qofki ka hor yimaaddana
Qawl waxay tiraahdaa Qofka kula hadlaayaa
Waxaweeye kii qabey Gabadhaada kii qabey

Qarad waa arkaysaan Qaallina qamuunyiyo
Qarracan bay ku sugan tahay Markay aragtay kii qabey
Oo uu nin kale qabo

Waa qawlad dunidiyo
Marki Qaali lagu yiri
Ayay qaddar yar telefon
Waxay tiri qasaariyo
Aabbe waa I qaladdeen
La idiin qabsanayaa
Wax kastoon ku kaco qalad
Qasab iigu soo diray
Anoon waayin qayrkay
Qurxoonow dalkaygii

Warku kuma qarsoomee
Habartii qac bay tiri
Qabadsiisay odaygii
Qabri baygu tuurteen
Qiyaamahana idinkaa
Qoortoon is gooyiyo
Idinkay qalqaalshoo
nin la qaboo qurbaha jira
Qurayshtay ku haystaan

Faarax qawl ku celin waa
Illintuuna qubayaa
In loo diidey labaqaar
Oo Qaalli hanan karey

Gabantiisa Qaalli ah
Wuxuu qoomameeyaa
Oo ahaa nin qiimo leh
Qoyskana anfici laa

Duqdii qarad qarracanki
Qaallina qammuunyiyo
Oo qol bay ku xiran tahay
Qabri bay ka jeceshahay

Qacday tiri ma soo noqon
Qarqarsi bay ku nooshay
Qurbahay dhex joogtana

Qoyskiina waa kaaas
Qof maqlaaba yaabyaye
Siduu yeelay qaarkood
Qiso uguba may noqon
Sow Gaani kama qorin.

Qisadiina waa taas
Inamadii qurbaha tegey
Sow Qaaf wax maleh iyo
Qaafleydan maansana

MMX Gaani, September, 2005
Tel :2525755782/2525441743
Email: mmhgani@yahoo.com,mmhgani@hotmail.com